

Bayaanka Rabitaanka In La Bixiyo Waxbarasho Ku Saleysan Guriga

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way Degmada Waxbarasho ee Puget Sound/Degmada King ee Washington

Waalid doonaya ilmahiisa ama carruurtiisa inay helaan waxbarashada guriga ku saleysan bedelkii uu ka dhigan lahaa ama laga diiwaangelin lahaa dugsiyada dadweynaha, dugsiyada gaarka loo leeyahay, ama barnaamijka ballaarinta ee dugsiyada gaarka loo leeyahay, waa inuu gudbiyaa caddeynta sannadlaha ah ee ku aadan rabitaanka ah inuu sidaas sameeyo isagoo isticmaalaya qaabkan hoos ku qoran:

Waxaan halkan ku caddeynayaa inaan ahay waalidka, mas'uulka, ama daryeelaha sharciga ah ee ilmaha(carruurta) hoos ku taxan; ilmahaas(carruurtaas) la sheegay wuxuu (waxay) jiraa inta u dhaxaysa da'ada 8 iyo 18 maadaama tani ay sidoo kale tahay shuruudaha laga helay cutubka 28A.225 Xaadiraada Khasabka ah ee RCW; Waxaan rabaa in ilmaha(carruurta) la sheegey ay helaan waxbarashada guriga ku saleysan sida lagu qeexay RCW 28A.225.010(4); iyo haddii qof shahaadeysan uu kormeerayo waxbarashada, waxaan muujiyey arrintan aniga oo saxiixaya meesha ku habboon.

Magaca(yada) Ilmaha(carruurta)

Taariikhda Dhalashada

() Waxbarashada ku saleysan guriga waxaa kormeeri doona qof shahaado ka haysta Gobolka Washington iyadoo la raacayo cutubka 28A.410 RCW.

Saxeexa

Taariikhda

Cinwaanka Wadada

Magaalada

Gobolka

Zip Koodhka

Qoraalkan waa in la buuxiyaa sanad kasta Sibtember 15 ama laba toddobaad gudahood bilowga kuwaatarka dugsiyada dadweynaha, saddex biloodlaha, ama simistarka iyadoo lala buuxinayo maamulaha guud ee degmada dugsi ee uu waalidku deggan yahay.

U dir:

Superintendent's Designee
Federal Way School District
33330 8th Ave S
Federal Way WA 98003

Nuqullada: Caddaan - Xafiiska Meelaynta Degmada

Jaalaha - Waalidka

RCW 28A.200.010

Waxbarashada guriga-ku-saleysan — Waajibaadka waalidiinta — Ka-dhaaftaanka shuruudaha qiimeynta dugsiga sare.

(1) Waalid kasta oo ilmahoodu helayo waxbarashada guriga-ku-saleysan ee hoos timaada RCW 28A.225.010 (4) waxaa ku waajib ku ah:

(a) Gudbiyo sanad kasta cadeyn saxeexan oo ah in iyadu ama isagu uu qorsheynayo in ilmahooda ama carruurtooda ay ku helaan waxbarashada guriga lagu qaato. Bayaanka waxaa ku jiri doona magaca iyo da'da cunugga, waa in lagu caddeeyaa haddii qof shahaado haysta uu kormeeri doona waxbarashada, iyo in loo qori doono qaab uu qeexey maamulaha guud ee waxbarashada dadweynaha. Waalid kasta waa inuu buuxiyaa bayaanka 15ka Sibtember ee sanad dugsiiyeedka ama labo usbuuc gudahood ee bilowga kuwaatarka dugsiga dadweynaha, saddex bilood, ama simistar iyadoo lala buuxinayo maamulaha guud ee degmada ay go'aan ka gaaraan heerka koorsada iyo fasalka la geeynayo ilmaha kadib markii lagala tashado waalidiinta oo dibna loo eego diiwaanada cunuga; iyo

(b) Hubso in buundooyinka imtixaanka ama qiimeynta horumarka sanadlaha ah iyo diiwaannada tallaalka, oo ay la socdaan diiwaanada kale oo la hayo kuwaas oo la xiriira howlaha waxbarashada ee la bixiyay, in loo gudbiyo dugsiyada dadweynaha ama gaarka loo leeyahay oo ilmaha loo wareejinaayo. Waqtiga u wareejinta dugsiga dadweynaha, maamulaha guud ee dugsiga degmada ee ilmaha ka diiwaangashan yahay wuxuu u baahan karaa in cunuga laga qaado imtixaan heerkiisu caadi yahay iyo in maamulka ay go'aan ka gaaraan heerka koorsada iyo fasalka la geeynayo ilmaha kadib markii lagala tashado waalidiinta oo dibna loo eego diiwaanada cunuga; iyo

(c) Xaqiiji in imtixaan heer caadi ah oo ay ansaxiyaan guddiga waxbarashada gobolka laga qaado ilmaha sanad kasta waxaana ka qaadaya shakhsi shaqadaas u qalma ama in qiimeyn sanadle ah oo ku saabsan horumarka waxbarashada ardeyga uu qoro qof shahaado haysta kaas oo hada ka shaqeyna dhanka waxbarashada. Golaha waxbarashada gobolka uma baahna carruurta inay la kulmaan yoolalka waxbarasho ee ardayda, inay bartaan shuruudaha lagama maarmaanka ah ee waxbarashada, inay qaataan qiimeynta, ama inay haayaan shahaadada guusha waxbarashada ama shahaadada guusha shaqsiyeed sida ku cad RCW 28A.655.061 iyo 28A.155.045. Imtixaanka caadiga ah ee la siiyo ama qiimeynta horumarka tacliimeed ee sanadlaha ah ee qoran waa in lagu daraa diiwaannada joogtada ah ee ilmaha. Haddii, natiijada imtixaanka/qiimeynta sanadlaha ah awgeed, loo go'aamiyo in cunugga uusan sameyneynin horumar macquul ah oo la jaan qaada da'diisa ama marxaladda koritaanka cunugga, waalidku wuxuu sameyn doonaa dadaal badan oo lagu saxayo arrimahaas.

(2) Haddii waalidka uu ka gaabiyo inuu u hogaansamo waajibaadka qaybtan waxaa loo arki doonaa inuu ku guuldaraystey cunugga inuu dhigto dugsiga iyada oo aan la helin sabab macquul ah sida hoos timaada RCW 28A.225.020. Waalidiinta fuliya waajibaadka ku xusan qaybtaan waxaa loo qaadan doonaa inay bixiyaan waxbarashada ku saleysan guriga sida lagu sheegay RCW 28A.225.010(4).

[2004 c 19 § 107; 1995 c 52 § 1; 1993 c 336 § 1103; 1990 c 33 § 178; 1985 c 441 § 2. Waagii hore RCW 28A.27.310.]

Qoraallo:

Cinwaanada qaybta iyo qodobada aan sharciga aheyn - Darnaanshaha - Taariikhda dhaqangalka - 2004 c 19: Eeg qoraalada la socda RCW 28A.655.061.

Ujeedooyinka Natiijooyinka - Cinwaanada qaybta aan sharciga ahayn - 1993 c 336: Eeg qoraalada la socda RCW 28A.150.210.

Natiijooyinka - 1993 c 336: Eeg qoraalka la socda RCW 28A.150.210.

Darnaanshaha -- 1985 c 441: Eeg qoraalka la socda RCW 28A.225.010.

Ardayda waqtiga-dhiman - Sharaxan – Iska-diiwaangelinta dugsiyada dadweynaha waa la oggolaaday: RCW 28A.150.350.

Iskuulada gaarka loo leeyahay - Barnaamijyada kordhinta ee loogu talagalay waalidiinta si ay wax u baraan carruurta ku jira daryeelkooda: RCW 28A.195.010.

RCW 28A.200.020

Waxbarashada guriga-ku-saleysan —Go'aanada qaarkood waa mas'uuliyada waalidka marka laga reebo haddii la cadeeyey.

Gobolku wuxuu oggolyahay in waalidiinta raba in carruurtooda ay helaan waxbarashada guriga ku saleysan sida hoos timaada RCW 28A.225.010(4) lagu qaadi doono kaliya shuruudka iyo qawaaniinta gobolka ugu yar kuwaas oo lagama maarmaan u ah in la xaqiijiyo in fursadaha waxbarashada aasaasiga ah la siiyo carruurta helaya waxbarashada noocaas ah. Sidaa daraadeed, dhammaan go'aanada la xiriira falsafada ama caqiidada, xulashada buugaagta, qalabka iyo manhajka waxbarida, iyo qaababka, waqtiga, iyo goobta lagu bixinayo ama lagu qiimeynayo waxbarashada guriga ku saleysan waa mas'uuliyada waalidka marka laga reebo arrimaha sida gaar ah loogu cadeeyey cutubkan.

[1990 c 33 § 179; 1985 c 441 § 3. Waagii hore RCW 28A.27.320.]

Qoraallo:

Darnaanshaha - 1985 c 441: Eeg qoraalka la socda RCW 28A.225.010.